**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

## WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA XEERKA CIIDANKA BOOLIISKA SOMALILAND XEER LR.63/2013

**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-308/052019

Taar: 17/05/2019

# Wareegto Madaxweyne

## Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland Xeer Lr. 63/2013

| | |
|---|---|
| **Markaan Arkay:** | Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobkiisa 90aad; |
| **Markaan Arkay:** | Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-39/830/2019, ee ku taariikhaysan 29/04/2019, ujeedadiisuna tahay soo gudbin go'aanka ansixinta Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland Xeer Lr. 63/2013; |
| **Markaan Arkay:** | Qodobbada 75aad iyo 76aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |

**Waxaan soo-saaray;**

Wareegtada Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland ee Xeer Lr. 63/2013 si loogu baahiyo faafinta rasmiga ah.

Allaa Mahad Leh

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# Go'aanka Ansixinta Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliiska

## Xeer Lr. 63/2013

**Markuu Arkay:-** Qodobka **78aad**, farqada **3aad** iyo **4aad**, ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Isagoo ka Duulaya:-** Nuxurka Qodobka 112aad ee Dastuurka Qaranka JSL kaas oo si cad u qeexaya Nabad-gelyada Gudaha iyo kaalinta ay ku leeyihiin maamulada Gobolada iyo Degmooyinku.

**Markuu Arkay :-** Soo jeedintii Xukuumada ee Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerkan Booliiska Xeer Lr. **63/2013.**

**MARKUU U ARKAY:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:63/2013** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **12/12/2018**

**MARKUU U ARKAY:-** Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:63/2013** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhsanayd **23/03/2019**

**MARKUU U ARKAY:-** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku samayeeyay kuna ansixiyeen sagaal iyo afartan **(49)** cod **Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliiska** Xeer (LR:63/2013)

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah oo afar iyo afartan **(44 cod)** mudane oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Wax-ka-Bedelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Booliiska** Xeer (LR:63/2013)

## ALLAA MAHAD LEH

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle** | **Baashe Maxamed Faarax** |
| Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL | Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL |

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADDU

**Markuu Arkay: -** Qodobada 124aad, 24aad, 26aad, 27aad, 29aad, 32aad, iyo Qodobka 34aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu ka duulay: -** Nuxurka Qodobka 112aad ee Dastuurka Qaranka JSL kaas oo si cad u qeexaya Nabad-gelyada Gudaha iyo kaalinta ay ku leeyihiin maamulada Gobolada iyo Degmooyinka.

**Markuu Tixgaliyay: -** In nafta aadamuhu ay tahay deeq Ilaahay, qofkastana uu xaq u leeyahay noloshiisa, wuxuu ku waayi karaa ay kaliya marka maxkamada horteeda uu kaga caddaado dembi uu xeer jideeyey.

**Markuu Qiimeeyay: -** In dhismaha iyo tababaradda ciidanka boolisku uu
Muhiimad gaar ah u leeyahay dhismaha qaranka jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Arkay:** Soo-jeedinta xukuumada ee wax ka beddelka iyo kaabista xeerkan Booliska ay kusoo sameysay.

## WUXUU ANSIXIYEY

Wax ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Ciidanka Booliska Somaliland

## Qodobka1[aad]
## Erey-bixin

| | |
|---|---|
| **Madaxweyne: -** | Waxa loolla jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Wasiir: -** | Waxa loolla jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Jsl. |
| **Taliyaha Ciidanka: -** | Waxa loolla jeeda Taliyaha Ciidanka Booliiska Jamhuuriyada Somaliland. |
| **Booliiska: -** | Waxa loolla jeedaa Ciidanka Booliiska Jamhuuriyada Somaliland |
| **Taliska** | Waxa loolla jeedaa Taliska Ciidanka Booliska. |
| **Qayb: -** | Waxa loolla jeedaa Taliska Ciidanka Booliska ee heer Gobol. |
| **Waax: -** | Waxa loolla jeedaa Ciidan Xirfad gaar ah u qaabilsan Ciidanka Booliiska, sida, ciidanka nabadgelyada wadooyinka, Dembi baadhista iyo ciidanka Wardoonka. |
| **Askari: -** | Waxa loolla jeedaa xubin kasta oo ciidanka Booliiska kamid ah oo aan darajo lahayn. |
| **Sarkaal: -** | Waxa loolla jeedaa xubin kasta oo ciidanka Somaliland ka mid ah oo gaadha daraja xidigle iyo wixii ka sareeye. |
| **Sarkaal-xigeen: -** | Waxaa loolla jeedaa xubin kasta oo ciidanka booliska ka mid ah oo leh darajada u Dhaxeysa alifle ilaa kormeere saddexaad. |
| **Ciidanka: -** | Waxa loolla jeedaa Ciidanka Booliiska JSL. |
| **Mudnaan: -** | Waxa loolla jeedaa kala Sareynta xubnaha ciidanka Booliiska Somaliland "seniority" |
| **Mutaysi: -** | Waxa loolla jeedaa Kasbashada dallaacadeed ama u Garashada, aqoon ee ay xubintu istaahisho "Merit." |
| **Hakin: -** | Waxa loolla jeedaa ka-joojin shaqada si ku-meel-gaadh ah "Suspension" |
| **Gef: -** | Waxaa loolla jeedaa fal lagu mutaysan karo ganaax asluubeed |
| **Dambi: -** | Waxaa loola jeedaa fal gaadhsiisan Xukun maxkamadeed |
| **Xeer-Ilaaliye: -** | Waxa loolla jeedaa Xeer ilaaliyaha Maxkamada Ciidamada |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

## CUTUBKA 1^AAD
## MABAA'DIIDA GUUD

### Qodobka 2^aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Ciidanka Booliiska Somaliland.**

### Qodobka 3^aad
### Ujeeddada Xeerka

Ujeedada Xeerkani waa:

1. In uu aasaaso qaab-dhismeedka, awooddaha iyo waajibaadka ciidanka Booliiska.
2. In uu sugo waajibaadka, xuquuqaha iyo masuuliyada xubnaha Booliiska ahaadaana kuwo sharciga ku salaysan.
3. In kor loo qaado Lana tayeeyo kartida Ciidanka Booliiska Somaliland iyo adeegyada bulsho ee ay Qaranka ugu xilsaaran yihiin.
4. In ciidanka booliska Somaliland loo tabbabaro, loona habeeyo qaab waafaqsan Shuruucda Dalka & tan caalimaga ah.

### Qodobka 4^aad
### Habka Adeegsiga Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhamaan xubnaha Ciidanka Booliiska Somaliland ee waqtiga xeerkani dhaqangalo u diiwaangashan Ciidanka Booliiska Somaliland iyo dhamaan xubnaha sifo Xeerkan waafaqsan loogu diwaangaliyo Ciidanka Booliiska Somaliland.

## CUTUBKA 2^AAD
## MASUULIYADDA GUUD EE CIIDANKA BOOLIISKA

### Qodobka 5^aad
### Ciidanka Booliiska Somaliland

Ciidanka Boolisku waa:

1. Qayb ka mid ah Ciidamada Jamhuuriyadda Somaliland
2. U adeegaha bulshada, isagoo ka madaxbanaan loolanka siyaasadeed, dhexna u ah Xisbiyada ama ururada siyaasadeed ee Qaranka iyo bulshadaba.
3. Inuu u guto xilkiisa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka.
4. In uu ka qayb qaato difaaca dalka Xaaladdaha Dagaalka iyo xaaladdaha deg-dega ah isagoo gacan ka siinaya Ciidanka Qaranka si waafaqsan dastuurka JSL.

### Qodobka 6^aad
### Masuuliyadda Guud ee Ciidanka Booliska

1. Booliiska Somaliland waxaa loo dhisay in ay masuul ka ahaadaan:
   - **B)** Sugida amaanka Guddaha ee dhulka Jamhuuriyadda Somaliland
   - **T)** Ilaalinta Dastuurka iyo shuruucda Jamhuuriyadda Somaliland
   - **J)** Ciidanka Boolisku marka uu gudanayo ma'suuliyadaha ku xusan xaqrada "B" iyo "T" ee qodobkan waxa loo raacayaa sida ku xusan Qodobka 16aad ee Xeerkan.
   - **X)** Ma'suuliyadaha Qodobkan iyo Qodobada kale ee xeerkan ama xeer kale ahi xil-gudashadooda ay ku saarayaan Ciidanka Booliska, looma macnaysan karo inay Ciidanka u banaynayaan ka hor-joogsiga muwaadiniinta adeegsiga Xuquuqaha iyo xoriyadaha ay u damaanad qaadeen Dastuurka iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah ee dalka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 7aad
## Shakhsiyadda Qaanuuneed

1. Booliiska Somaliland wuxuu leeyahay shaqsiyadiisa qaanuuneed ee u gaarka ah, isagoo yeelanaya magaciisa iyo astaantiisa u gaarka ah, si waafaqsan Xeerkan
2. Booliiska Somaliland wuxuu leeyahay madax banaanidiisa maamul iyo maaliyadeed, gudashada shaqadiisana waa u madaxbanaan yahay.

## Qodobka 8aad
## Astaamaha Ciidanka Booliiska Somaliland

1. Astaanta ciidanka Booliisku waa madax goodir oo dulsaaran barkin hareerahana kaga wareegsan yihiin laba caleemood oo ku dhex jira midab Buluug ah.
2. Astaanta Ciidanka Booliisku waxay gaar u tahay Ciidanka Booliiska Somaliland oo keliya waana lama taabtaan.
3. Astaanta Ciidan Booliiska Somaliland waa in ay ka muuqataa direyskooda, shaambadahooda, aqoonsigooda iyo waxkasta oo u gaar ah Ciidanka.

## Qodobka 9aad
## Xuduudda Hawl-fulineed ee Ciidanka Booliska

Ciidanka Booliiska Somaliland wuxuu ka hawlgelayaa dhamaan xudduudihiisa dhuleed ee Jamhuuriyada Somaliland iyo Goob kasta oo kale oo sharciga Jamhuuriyada Somaliland ama sharciga Caalamiga ahi ogol yahay in ay ka hawlgalaan.

# CUTUBKA 3AAD
# HOGAAMINTA GUUD

## Qoddobka 10aad
## Awoodda Madaxweynaha ee Ciidanka

1. Madaxweynuhu waa Taliyaha Guud ee Ciiddamada Qaranka JSL oo Ciiddankan Booliskuna ka mid yahay, sida uu dhigayo Qoddobka 90aad faqradiisa 4aad ee Dastuurka JSL.
2. Madaxweynuhu wuxuu awood u leeyahay Magacaabidda iyo xilka qaadista Taliyaha Ciidanka Booliska iyo ku-xigeenadiisa marka uu la tashado wasiirka sida uu dhigayo qodobka 90aad firqadiisa 3aad xarafka (d) ee Dastuurka JSL.
3. Waxa kale oo uu Madaxweynuhu ku leeyahay Ciidanka Booliska Somaliland awoodaha ay ka mid yihiin; -
   b) Waxa uu bixiyaa derajooyinka Ciidanka Booliska ee Xidigle iyo wixii ka sareeya
   t) Waxa uu bixiyaa billad sharafeedyada iyo abaalmarinnada ay mutaystaan xubnaha ciidanka Boolisku.
   j) Waxa uu ciidanka booliska ku hogaamiyaa siyaasadda guud ee xukuumadda,
4. Waxa kale uu fuliyaa hawlaha Xeerkan iyo xeerarka kale ee kasoo baxa Golayaasha Xeer-dejintu ay awood u siiyaan.

## Qodobka 11aad
## Doorka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Ciidanka

Wasaaradda u waxay ciidanka booliska ku leedahay xilalkan iyo awoodahan hoos ku xusan: -

1. Horumarinta iyo kobcinta aqoonta Ciidanka Booliska Somaliland.
2. Ka hawl-gelidda in la daboolo baahida agabyada kala duwan ee Ciidanka Booliska.
3. Curinta xeerarka, siyaasadaha iyo istratejiyadaha horumarinta Ciidanka Booliska iyo u gudbintooda Golaha Wasiirada ah.
4. Isku xidhka Ciidanka Booliska iyo Ha'yadaha kale ee xukuumadda.
5. Ka shaqaynta sidii fursado waxbarasho dibadeed iyo kuwo gudaha ahba loogu heli lahaa Ciidanka Booliska.
6. Soo saarista Xeer-nidaamiyayaasha xeerkan iyo xeerarka kale ee Ciidanka Boolisku awood u siiyaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH

7. Kormeeridda iyo dul kala socodka hawlaha ciidanka booliska Somaliland.
8. La socodka xaaladda nabedgelyo iyo hubinta in ciidanku guud ahaan hawshoodii u gudanayaan si waafaqsan xeerkan iyo Dastuurka JSL.
9. Kala talinta Madaxweynaha magacaabista iyo xilka qaadista Taliyaha iyo ku-xigeenadiisa.
10. Fulinta hawlaha kale ee xeerkan Ama xeerarka kale ciidanka ee khuseeya.
11. Uga-warbixinta Madaxweynaha iyo Golaha Wasiiradda xaaladda guud ee nabedgalyada dalka

## CUTUBKA 4$^{AAD}$
## QAAB-DHISMEEDKA CIIDANKA BOOLIISKA

### Qodobka 12$^{aad}$
### Qaab-Dhismeedka

1. Qaab-dhismeedka ciidanka booliiska Somaliland waxa uu ka kooban yahay;

B) Taliska ciidanka booliiska oo ka kooban
   I. Taliye
   II. Laba Taliye ku xigeen
   III. Hoggaano
T) Qaybo iyo Waaxo toos u hoostag Taliska.
J) Saldhigyo iyo Rugo

### Qodobka 13$^{aad}$
### Awoodda Iyo Masuuliyada Taliyaha Ciidanka Booliiska

1. Sarkaalka taliyaha ciidanka booliiska loo magacaabayaa waa in uu
   b) Leeyahay karti, aqoon akaademiga iyo waaya'aragnimo
   t) Leeyahay awood hogaamineed oo uu ku hanan karo xilkaa loo igmaday
2. Taliyuhu waa masuulka ugu sareeya hogamaaminta iyo maamulka ciidanka booliiska.
3. Taliyaha ciidanka booliiska Somaliland isagoo dhowraya Xeerarka iyo Xeer-nidaamiyaha u degsan ciidanka booliiska, wuxuu awood u leeyahay: -
   B. Hogaaminta iyo isu xidhka shaqo iyo hawl-galinta ciidanka
   T. Qorsheynta iyo Jaangoynta tirada ciidanka hadba sida baahida shaqo tahay
   J. inuu wasiirka arrimaha Gudaha si joogto ah ula socodsiiyo Xaalada nabadgalyada guud ee dalka
   X. Qabyo tirka iyo qalabeynta ciidanka sida gaadiidka, Isgaadhsiinta iwm iyo inuu hirgaliyo barro caafimaad oo ciidanka u gaar ah.
   K. Abuurida nidaam guud oo la xidhiidha habka qorista booliiska iyo shaqaalaynta,
   h. aqoonta iyo tababarrada, labiska dirayska iyo qaadashada hubka, iwm
   d. Abuurida xarumaha tababarada booliiska, kashaqaynta iyo fududaynta helitaanka tababarro aqooneed iyo xirfadeed ee dalka
   r. Magacaabida guddi qiimeyneed.
   s. Dalacaadda derajooyinka, wuxuu taliyaha ciidanku awood u leeyahay wixii ka hooseeya xidigle isagoo oo ku soo saaraya wareegto.

### Qodobka 14$^{aad}$
### Shuruudaha looga Baahanyahay Taliyaha iyo taliye xigeenkiisa

Shuruudaha lagu xulanayo taliyaha ciidanka Booliska Somaliland waa: -
1) Inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay
2) Inuu Muslim yahay kuna dhaqmo diinta islaamka
3) Inuu jidh ahaan iyo caqli ahaan ba gudan karo xilkiisa.
4) Inuu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuba toosan yihiin.
5) Inaan uu ku dhicin xukun ciqaabeed oo kama danbeys ah shanti sano ee u danbeeyay.

6) Inuu leeyahay aqoon udhiganta heer jaamacadeed, amaba uu leeyahay khibrad ciidan oo ah ugu yaraan 15 sano.

## CUTUBKA 5$^{AAD}$
## WAAJIBAADDKA GUUD EE CIIDANKA BOOLIISKA

### Qodobka 15$^{aad}$
### Waajibaadka Guud ee Ciidanka Booliska

Waajibaadka Guud ee ciidanka booliiska Somaliland waa: -

1. Illaalinta iyo sugida nabadgelyada dalka guddihiisa.
2. Badbaadinta iyo illaalinta nafta iyo hantida guud iyo ta gaar ahaaneed ee dadka.
3. Ilaalinta Xoriyaadka aasaasiga ah ee qofka.
4. Fulinta iyo ku dhaqanka shuruucda iyo xeerarka dalka u dejisan
5. Ka hortagga iyo baadhista denbiyada si waafaqsan Xeerarka dalka
6. Tiro-koobka iyo ururinta faldanbiyeedka sanad kasta.
7. Dabagalka iyo soo qabashada eedaysanyaasha iyo horgeyntooda maxkamadda.
8. Oogista dacwaddaha maxkamaddaha hortooda ay booliisku wakiil uga noqon karaan falkii iyo heerkii uu xeer ilaaliyaha guud u igmaddo.
9. Xidhiidhka iyo wadda shaqaynta Hay'adaha amniga ee kale.
10. Xidhiidhka booliiska caalamiga ah (Interpol)
11. Ilaalinta iyo sugidda nabad-gelyadda diblomaasiyiinta shisheeye ee dalka jooga.
12. Ka qaybgalka hawlaha gurmadka hadii ay dhacaan duruufo lama filaan ah sida duufaanadda, dhulgariirka iwm.
13. Taageerada iyo xoojinta ciidanka qaranka haddii ay timaado xaalad dagaaal.
14. Ilaalinta maamuuska iyo dhawrista xasaanadda iyo karaamadda shakhsinimo ee Golayaasha Qaranka.
15. Ilaalinta xarumaha hay'adaha dawladda, Sugida amniga madaxda sare ee xukuumada, xubnaha baarlamaanka, martida iyo dublamaasiyiinta wadamada shisheeye.
16. Isku dubaridka iyo kaydinta xogta denbiilayaasha iyo bixinta cadaynta dambi la'aanta.
17. Samaynta xog isweydaarsiyada iyadoo lala abuurayo xidhiidh iskaashi booliiska Wadamada aynu jaarka nahay.
18. Fulinta amaradda iyo go'aanada sharciga ah ee kasoo baxa Maxkamaddaha iyo Xeer Illaalinta
19. Horgeynta markhaatiyada maxkamadaha ee dacwad oogista.
20. Qabashada alaabada kootarabaanka ah iyo u gudbinta hay'adaha cashuuraha.
21. Xaqiijinta ku dhaqanka xeerarka wado-marista gaadiidka iyo baadhista shilalka.
22. Ururinta, qiimaynta iyo ku baahinta hay'addaha ay khusayso denbiyada iyo shilalka guud ee dalka ka dhaca.
23. Fulinta awoodaha iyo waajibaadyada kale ee ay siiyeen Xeerarka kale ee dalku.

### Qodobka 16$^{aad}$
### Awooddaha Ciidanka Booliiska

Ciidanka Booliisku wuxuu awood u leeyahay:

1) In ay qabtaan, xidhaan, sharcigana horkeenan cid kasta oo fal denbiyeed diyaarinaysa, isku dayaysa, amaba faraha kula jirta iyaga oo u raacaya si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka habka ciqaabta ee dalka.
2) In ay baadhaan soona qabtaan cid kasta oo lagu tuhmo in ay abaabulayso ama qorshaynayso fal-dembiyeed ka dhan ah nabedgalyada dalka, nafta iyo maalka shacabka Somaliland iyo Dadka shisheeyaha ee dalka ku nool sharcigana ku horgeeyaan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

3) Ciidanka Booliisku uma isticmaali Karaan rasaas nool dad aan hubeysnayn, haddii aanay nabbed-galyada guud ee qaranka wax u dhimayn
4) Ciidanka Boolisku waxay u isticmaali karaan awood ciidan cid kasta oo iska-caabin kala hor timaada marka ay waajibaadkooda shaqo gudanayaan si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
5) Awooda ciidan eek u xusan faqrada 4aad ee qodobkan waxa ay Ciidanka Boolisku isticmaali karaan;
b) Marka ay lagama-maarmaan tahay inay ku badbaadiyaan ama ay ku ilaaliyaan nafaha iyo hantida shacabka ay amaankooda mas'uulka ka yihiin ama naftooda iyo hubkooda ku badbaadinayaan
t) Marka ay ka hortagayaan khater degdeg ah oo dhimasho ama dhaawac culus ku keenaysa nafaha shacabka ama khatergelinaysa nafahooda.
j) Marka la qabanayo qof fal-dembiyeed culus ku eedaysan oo ka baxsanaya gacan-ku-haynta Booliska, ama ka baxsanaya xabsigii uu ku jirey
x) marka sifo sharci ah lagu baadhayo qof looga shakinsan yahay fal-dembiyeed culus oo qofkaasi iska-caabin xooggan kala hor-yimaado ciidanka ama isku dayay inuu baxsado
6) Marka ay Ciidanka Boolisku isticmaalayaan awood ciidan waa inay isa sheegan, si cadna u bixiyaan digniin ah in ay isticmaalayaan awood ciidan iyo hub
7) Digniinta ku xusan faqrada 5aad ee qodobkan ma bixinayaan ciidanku haddii ay naftooda khater galinayso, ama aanay ku haboonayn in ay digniinta bixiyaan.
8) Askari kasta oo boolis ah oo isticmaalaya awoodda ciidan si waafaqsan faqrada 4aad ee qodobkan waxa ku waajib ah:
b) Haddii isticmaalka awoodu ay keento dhimasho ama dhaawac, waa in uu siiyaa adeeg caafimaad oo deg-deg ah cida dhibtu gaadhay, sida ugu dhakhsaha badan u geeyaa goobta caafimaad ee ugu dhow
t) In uu warbixinta dhacdadaas sida ugu dhakhsaha badan ugu gudbiyaa sarkaalka ka sareeya
9) Ciidanka Boolisku marka ay gudanayaan waajibaadkiisa shaqo eek u xusan qodobkan waa inay ilaaliyaan xuquuqda qofka ee ku xusan dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeya
10) Markasta oo Ciidanka Boolisku Hawl-gal fulinaayo sarkaalka Ciidanka wata oo kaliya ayaa u xaq leh inuu la hadlo cida hawsha lagu fulinayo
11) Si xeerkan iyo xeerarka kale ee Dalka waafaqsan haddii hawlgallada ay Ciidanka Boolisku fulinayaan ay ku keento dadweynaha khasaare naf iyo maalba leh, marka baadhista la sugo waxa loo gudbinayaa wasaaradda, si loo siiyo magdhow ku haboon dhibanaha

## Qodobka 17^aad
## Xil-Gudashada Xubnaha Ciidanka Booliiska

1. Si loo ilaaliyo xil-gudashada ciidanka Booliska, Xubinkasta oo ka tirsan ciidanku waa in ay leedahay kaadhka aqoonsiga ee ciidanka iyo direyskii ciidanka oo uu ku mujisan yahay lamber u gaaar ah xubin kasta
2. Xubinkasta oo ciidanka booliiska ahi waxay waajibkeeda u gudanaysaa si waafaqsan Dastuurka, xeerkan iyo Xeerarka kale ee dalka.
3. Waa in Hadal/qoraal loogu sheegaa hawsha ay u xilsaaran tahay, waajibaadkeeda iyo awoodeeda, isla markaana lagu tababaraa.
4. Tababarada Ciidanka Booliska iyo noocyadooda, ee la siinayo xubnaha ciidanka waxa lagu faah-faahindoona xeer nidamiye uu soo saaro wasiirku.
5. Waajibaadyada shaqo ee xubin ama koox loo dirayaa waa in ay ahaadaan kuwo sharci ah, isla markaana ku salaysan Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee khuseeye hawlaha ciidanka booliska.

# CUTUBKA 6^AAD
# SHAQADA IYO ARRIMAHA CIIDANKA
## Qodobka 18^aad
## Shaqada Joogtada ah

Waxaa loo aqoonsanayaa in si joogto ah shaqada booliiska ugu jirto xubin kasta oo si rasmi ah loogu qaatay ciidanka booliiska oo:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

b) Shaqada ku jirta
t) Fasax ku maqan
j) Shaqada laga hakiyay

## Qodobka 19aad
## Dhammaadka Shaqada Xubnaha Ciidanka

1. Shaqada xubnaha ciidanka boolisku waxay dhamaanaysaa haddii ay dhacdo mid ama wax ka badan sabahan soo socda: -
   B. Geeri ku timaada xubinta booliiska.
   T. Haduu ama Haday gaadho da'da hawlgabka isagoo shaqada sii hayn karo haddii loo arko lagamarmaan
   J. Haddii dhakhtar caddeeyo in aanu hawsha gudan Karin.
   X. Haddii uu is-casisho oo isla markaana laga aqbalo, waana in ay ahaataa qoraal rasmiya.
KH. Haddii shaqada lagaga eryo sifo sharciga waafaqsan
   D. Hadii uu ku dhaco xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

## Qodobka 20aad
## Diwaanka Guud ee Ciidanka

1. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka booliiska waxay yeelanaysaa fayl u gaar ah oo loo sameeyo maalinta la qoro shaqada, iyadoo dhacdo kasta oo noloshiisa ama nolosheeda ciidanimo la xidhiidha lagu kaydinayo, sida noocyada shaqo ee uu qabtay, tababarada uu qaatay, waxbarashada uu helay, dalacaada, xilka, abaal-marinta, anshax marinta, bedelka, hoos u dhigida, denbiyada uu galay, fasaxyada iyo dhacdo kasta oo kale oo ay tahay in la kaydiyo, iyadoo faylkaasi yeelanayo lambarka ciidan ee la siiyay maalintii la qoray.
2. Qaabka loo xafidayo, cida awoodda u leh wax ka bedelkiisa iyo habka lagu ogolaan karo eegistiisa ama nuqul ka helidiisa waxaa lagu nidaaminayaa Xeer-nidaamiyayaasha ciidanka booliiska Somaliland oo uu Wasiirka Arimaha Gudahu soo saarayo

## Qodobka 21aad
## Derajada iyo Dirreyska

1. Derajada iyo dirrayska ciidanka booliiska waxa lagu soo saarayaa Xeer nidaamiye gaar ah.
2. Xubnaha Ciidanka Booliisku waxay u kala amar qaadanayaan sida ay u kala derejo sareeeyaan.
3. Haddii laba qof oo Ciiddanka Booliiska ka tirsani isku darajo noqdaan waxay u fullaysaa kala amar-qaadashadooda sida ay derejada ugu kala hor qaateen, haddii ay mar wada qaateena sida uu magacooddu uu ugu soo kala horeeyo liistadda.

## Qodobka 22aad
## Fasaxyada Shaqada

Fasaxyada xubnaha booliiska, noocyada fasaxa, hab-raaca fasax bixinta iyo cidda awoodda u leh ogolaanshaha fasax kasta, waxaa lagu sheegayaa Xeer-nidaamiyahaa xeerkani jidaynayo.

## Qodobks 23aad
## Mushaharada & Gunooyinka

Xubin kasta oo ciidanka booliiska ahi: -

1. Waxay yeelanaysaa mushahar go'an.
2. Waxay yeelan kartaa gunno.
3. Heerarka mushaharka iyo gunnooyinka waxa lagu soo saarayaa xeer madaxweyne marka uu la tashado haya'ddaha ay khusayso



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
SOLICITOR ... OFFICE
OFFICIAL GAZETTE

4. In la siiyo mushahar u dhigma shaqada uu hayo.
5. Wuxuu kaloo mutaysan karaa gunno waxaana lagu faah-faahinayaa xeer-nidaamiyaha ciidanka booliiska Somaliland.

## Qodobka 24aad

## Abaal Marinta Xubnaha Ciidanka Booliska

1. Xubnaha ciidanka booliska waxaa la siin karaa abaal-gudyadan soo Socda iyagoo qoraal ah faylkiisana loo galinayo: -
   b. Amaan caad ah
   t. Abaal gud caad lacageed
   j. Amaan gole jog
   x. Abaalgud qiimayn hawleed
   Kh. Bilad sharaf ama bilad geesi
   d. Dalacaad abaal marin gaar ahaaneed
   r. Fasax abaalgud
2. Farqada 1aad ee qodobkan abaal-gudyadaas cidda bixinaysa iyo qaabka loo bixinayo abaalmarinta waxaa lagu Xusayaa xeer nidaamiyaha uu xeerkani jidaynayo.

## Qodobka 25aad

## Dhimashadda, Dhaawaca iyo Naafada Xubnaha ciidanka Booliiska

1. Xubinta ka mid ah booliiska ee lagu dilo isagoo waajibaadkiisa ciidan gudanaya ama lagu dilo aargoosi ka dhashay waajibaadkiisa ciidan ee uu gudanayey waxaa magtiisa ama magteeda bixinaya dawlada, waxaana la horgaynayaa cadaalada
2. Xubinta Ciiddanka Booliiska ee lagu dilo hawl-gal sharciga waafaqsan waxaa dhibane ka ah Qaranka JSL, oo ay waajib ku tahay inuu bixiyo magtiisa ama dhaawaciisaba. Ciddii falkaas gaysatayna meel kastaba ha tagtee qaranka ayaa ka goosanaya, soona qabsanaya, sharcigana hor keeenaya.
3. Xubin kasta oo booliis ah oo lagu dhaawaco ama ku dhaawacanta ama ku naafawda ama waxyeelo soo gaadho iyadoo waajibaad Ciidan gudanaysa wuxuu ama waxay dawlada xaq ugu leeyahay daawayntiisa iyo xannaanayntiisaba.
4. Naafada iyo dhaawaca xubnaha booliiska waxaa lagu nidaaminyaa xeer-nidaamiyaha ciidanka booliiska Somaliland

## Qodobka 26aad

## Hawlgelinta Ciidanka

Xubin kasta oo Ciiddanka Booliiska ka tirsan waxaa loo bedeli karaa goob aan ahayn goobtii uu shaqada ka hayay ama shaqo ka duwan shaqadii uu hayay oo la xidhiidha waajibaadka Ciiddanka Booliiska si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 27aad

## Qiimeynta Shaqada xubnaha ciidanka

Qof kasta oo ciidanka booliiska ka tirsan, wax qabadkiisa, kartidiisa, asluubtiisa, daacadnimadiisa iyo hawl-karnimadiisa waxaa si joogta ah loogu samaynayaa qiimayn, iyadoo hab-raaca qiimaynta, ka go'aan qaadashada qiimaynta, iyo masuuliyiinta qiimaynta u xilsaaran lagu faahfaahin doona Xeer-nidaamiyaha.

## Qodobka 28aad

## Dhaarta xubnaha Ciidanka

Xubin kasta oo ciidanka booliiska Somaliland loo qaato marka shaqada la qorayo **waa in la mariyaa** dhaartan dastuuriga ah ee ku xusan qodobka 129aad ee Dastuurka qaranka una dhigan sidan "**WAXAAN ILAAHAY UGU DHAARTAY IN AAN U NOQONAYO DAACAD DIINTA ISLAAMKA,**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

DALKAYGA SOMALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAALAD INTA AAN XILKA HAYO".

## CUTUBKA 7^AAD
## ASLUUBTA & ANSHAX-MARINTA

### Qodobka 29^aad
### Hab-dhaqanka Asluubeedka ee Ciidanka

1. Ciidanka Booliisku waa in uu yeeshaa hab-dhaqanka asluubeed, kaas oo laga rabo xubin kasta oo ciidanka booliiska ka tirsan.
2. Hab-dhaqanka asluubeed ee faqrada 1^aad ee qodobkani xustay waxaa lagu faah-faahinayaa Xeer-nidaamiyaha ciidanka booliiska.

### Qodobka 30^aad
### Waxyaabaha Ka Reeban Xubnaha Ciiddanka Booliiska

Xubnaha ciidanka booliska waxaa ka reeban:

1. In aanay dan gaar u ah u adeegsan awoodooda iyo haybadooda booliisnimo.
2. In ay qabtaan shaqo kale oo ka duwan tan ciidanka inta ay ciidanka ka tirsan yihiin.
3. In aanay kala hor-iman hub ciidamada kale ee Qaranka, ciidanka booliiska dhexdiisa ama dadka rayidka ah, marka laga reebo xaaladaha sharcigu u ogolaaday.
4. Inay xubin ka noqdaan xisbi siyaasadeed ama urur Siyaasadeed.
5. Inay bixiyaan xog ama ka waranto xaalad ciidanku la kulmay ama xubintaasi la kulantay.
6. In ay aqbalaan hadiyad ama wixii lagu sharfo haday tahay mid si toos ah lagu siiyey ama cid kale loo soo mariyey.
7. Inay iscasilaadeeda soo gudbiso iyada oo lagu jiro xaalad dagaal, xaalad degdeg ah ama baadhisi ku socoto.

### Qodobka 31^aad
### Talaabooyinka Anshax marineed

1. Waxaa banaan in xubinta ciidanka booliiska ee lagu helo gef ka dhan ah xeerkan lagu qaado mid ka mid ah anshax-marinahan:
   b) Digniin qoraala faylkiisana loo galiyo
   t) Mushahar ka goyn aan ka badnayan afar dalool oo meel mushaharka xubinta muddo aan ka badnayn laba bilood qoraala faylkiisana loo galiyo.
   j) Guno ka joojin muddo aan ka badnayn saddex bilood qoraala faylkiisana loo galiyo.
   x) Dalacaad ka reebis muddo aan ka badnayn sanad xilliguu mutaystay qoraala faylkiisana loo galiyo.
   Kh) Xadhig asluubeed aan ka badnayn 42 maalmood.
   D) Cida awoodda u leh anshax marinta waxa lagu qeexi doonaa xeer-nidaamiyaha Xeerkan.

### Qodob 32^aad
### Dambiyadda Ciqaabta:

1. Xubin kasta oo ka tirsan ciidanka booliska oo lagu soo eedeeyo fal-dembiyeed ciqaab ah waxa la hor-gaynayaa Maxkamada awooda u leh, habka gar-qaadistana waxa loo raacaya xeerarka habka ciqaabta iyo xeerka ciqaabta guud.
2. Fal-dambiyeedyada ciqaabta ah ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan waxa awood garsoor u leh Maxkamada Ciidamada si waafaqsan qodobka 104aad firqadiisa 1aad ee Dastuurka JSL

### Qodobka 33^aad
### Reebanaanta iyo Anshaxmarinta Dambiyadda ka dhanka ah Bani Aadanimada

Waxaa ka reeban xubnaha ciidanka booliska:



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

1. Ma banaana fal dambiyeed kasta oo ka dhan ah bani aadanmimada sida jidh-dilka, Maskax ka dil iyo dhamaan faldambiyeedyada ku sifooba.
2. Xubin kasta oo booliis ah ee ku kacda faldambiyeedyada ku xusan faqrada 1[aad] ee qodobkan isaga ayaa ka masuul ah
3. Xubin kasta oo booliis ah oo ku sifawda farqada 1aad ee qodobkan waxaa lagu ciqaabayaa xadhig gaadhaya 5 ilaa 10 sanno.

## CUTUBKA 8[AAD]
## CABBASHADA KA DHANKA AH CIIDDANKA BOOLIISKA

### Qoddobka 34[aad]
### Xafiiska Dabagalka iyo Cabashooyinka Dadweynaha

1) Xeerkani waxa uu aas-aasayaa Gudidda Dabagalka Iyo Cabashooyinka Dadweynaha ee heer Gobol iyo Gudidda Cabashooyinka ka dhanka aha ciidanka booliska oo noqonaya heer Qaran.
2) Gudidda Dabagalka iyo Cabashooyinka Dadweynaha heer gobol waxay ka koobnaanayaan 3 xubnood oo kala ah
   b) Taliyaha Qaybta Heer Gobol
   t) Xoghayaha Fulinta Gobolka iyo Sarkaalka katirsan Qaybta Gobolka
3) Gudidda Dabagalka iyo Cabashooyinka dadweynuhu waxa ay awood u leeyihiin: -
   b) Inay qabtaan, baadhaan isla markaana dhageystaan cabashooyinka ka dhanka ah xubnaha Ciidanka Booliska;
   t) In ay u yeedhaan xubinta ama xubnaha ciidanka ee cabashada laga soo gudbiyay;
   j) In ay go'aan ka gaadhaan cabashada loosoo gudbiyay mudo 10 cisho ah.

### Qodobka 35[aad]
### Awoodda Guddida Cabashada Ka-dhanka ah Ciidanka Booliska

1) Cabashooyinka ka dhanka ah Ciidanka Booliiska Somaliland waxa marka hore loo gudbinayaa xafiisyada dabagalka iyo cabashooyinka Dadweynaha ee heer Gobol.
2) Xafiiska dabagalka cabashooyinka dadweynaha ee heer Gobol marka uu helo cabashada waxa ku waajib ah in uu darso islamarkaana go'aan kasoo saaro.
3) Haddii lagu qanci waayo go'aanka Xafiiska dabagalka iyo cabashooyinka dadweynaha ee heer gobol, waxa cabashada go'aankaasi loo gudbinayaa Taliyaha ciidanka. Kaasi oo cabashadaas darsaya go'aanna ka soo saaraysa.
4) Taliyaha Ciidanka waxa waajib ku ah marka uu helo go'aanka Guddida heer Gobol iyo cabashada xarafka (3) waa inuu go'aan ka gaadho mudo 10 cisho ah, haddii lagu qanci waayo ama uu xalin kari waayo cabashadaas taliyaha ciidanku wuxuu u gudbinayaa Gudidda Cabashooyinka Ciidanka ka dhanka ah ee heer Qaran.
5) Guddida cabashooyinka heer qaran waxay ka kooban yihiin 5 xubnood oo kala ah: -
   b. Xubin Guddida nabedgelyada iyo Difaaca ee Golaha Guurtida (Gudoomiye)
   t. Xubin Guddida Arrimaha Guddaha ee Golaha Wakiilada
   j. Xubin Wasaaradda Arrimaha Guddaha (Xoghaye)
   x. Xubin Sarkaal Booliska ka tirsan/Khabiir booliis
   kh. Xubin Komishanka Xuquuqda Aadamaha ee Qaranka JSL.
6) Awoodaha Guddida inay soo baadhan markay helaan cabasho ka dhan ah Xubin ama Koox kamid ah Ciidanka Booliska waxayna qaadayaan talaabooyinkan
   b. Inay u yeedhaan dhinacyada (Power to Summon)
   t. Inay dhageystaan dacwadda dhinacyada
7) Inay Go'aan kasoo saran dembiyada ku xusan faqrada 8aad ee qodobkan go'aankooduna waxa uu ku ansaxayaa 1/3 tirada xubnaha codbixinta leh inay go'aankooda u gudbiyaan xeer-ilaaliyaha Maxkamada Ciidamada si ay ugu soo oogto Dacwad xubintii Booliska ahayd ee fal dembiyeedka gashay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE

8) Xeer-ilaaliyaha Maxkamada Ciidammada waa in uu muddo todoba cisho gudahood ah ku oogaa dacwada, isaga oo ku horgeynaaya maxkamadda awoodda u leh.

## Qoddobka 36[aad]
## Cabbashada Ciiddanka Booliska

1) Haddii xubin ama koox Ciiddanka Booliska ka tirsani ay ka cabbanayaan Madaxdooda ama ay dhibaato kale la soo deristo, waxay codsigooga u gudbinayaan Talliyaha Qaybta ay ka tirsan yihiin.
2) Hadii uu Taliyuhu wax ka qaban waayo cabbashadaasi waxay u gudbinayaan Taliyaha Ciidanka Booliska.
3) Haddii Taliyaha Ciidanku uu cabbashadaasi waxba ka qaban waayo waxay u gudbinayaan Wasiirka.
4) Wasiirku marka uu helo cabashadaas xubinta ama xubnaha waa in uu darsaa go'aana kasoo saaraa.

# CUTUBKA 9[AAD]
# HANTIDA, QALABKA, HUBKA & MIISAANIYADDA

## Qodobka 37[aad]
## Diiwaangelinta Hantida Ciidanka Booliiska

1. Ciidanka booliisku wuxuu yeelanayaa hanti guurta iyo ma guurto ah oo uu u adeegsanayo gudashada waajibaadkiisa, waana hanti qaran, cidina dan gaar ah uma isticmaali karto.
2. Dhammaan hantida ma guurtada ah ee ciidanka booliiska waa la diiwaangelinayaa.
3. Taliyaha ciidanka booliisku wuxuu dejinayaa hab-raacyo maamul (Administrative procedures) oo si gaar-gaar ah loogu maamulo hantida ciidanka.

## Qodobka 38[aad]
## Daryeelka hantida iyo qalabka Booliiska

Xubin kasta oo ciidanka ka mid ah waxa ku waajib ah ilaalinta, dayactirka iyo daryeelka hantida iyo qalabka ciidanka booliiska ee uu mas'uulka ka yahay.

## Qodobka 39[aad]
## Hubka & Rasaasta

Hubka Dawlada ayaa iska leh, qoryaha iyo rasaasta lagu qarameeyo xubnaha ciidankana, waxay ka mid noqonayaan hubka ciidaanka, dibna looguma celinaayo xubinta ciidanka ka tagta ama laga eryo ama hawlgab noqota ama geeriyoota.

## Qodobka 40[aad]
## Miisaaniyadda ciidanka Booliiska

1. Dhaqaalaha ciidanka booliisku wuxuu ka iman karaa:
    - b. Xaddiga miisaaniyada Qaranka looga qoondeeyay Booliiska
    - t. Kaalmo xukuumada dhexe ku kabto
    - j. Kaalmo D/hoose ku kabaan
    - x. Qormada ganaaxyada sharcigu uga qoondeeyay
2. Maaliyada booliiska waxaa lagu maamulayaa hab waafaqsan Xeerarka xisaabaadka dawlada, xeer-nidaamyada booliiska iyo hab-raaca maamul ee xeerkan lagu sheegay.
3. Taliyaha booliiska iyo saraakiisha uu u igmadaa waxay masuul ka yihiin ilaalinta, kormeerka, dabagalka habsami u maamulka maaliyada booliiska.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 41aad

## Hanti Dhawrka Xisaabaadka Ciidanka

Taliyaha ciidanka booliisku wuxuu abuurayaa hanti-dhawr gudaha ah (Internal Auditor) oo ciidanka gaar u ah oo ka kooban saraakiil aqoon dheer iyo waaya'aragnimo u leh xisaabaadka oo si waqtiile ah ama mar kasta oo loo baahdo shaqayn kara.

## Qodobka 42aad

## Qaadhaanka Ciidanka Booliiska

Ciidanka Booliisku waxuu samaysan karaa sanduuq dhaqaale oo ku yimaada qaadhaanka ciidanka booliiska dhexdooda, waxaana qeexi doonna xeer-nidaamiyaha.

# CUTUBKA 10AAD

# MASUULIYADA GUUD & MASUULIYAD GAARKA AH

## Qodboka 43aad

## Masuuliyadda Denbiga iyo Ciqaabtiisa

1. Xubnaha ciidanka booliisku waxay masuul ka noqonayaan denbiyada ay sida badheedhka ah uga galaan Qaranka, waxaana loo raacayaa Shareecada Islaamka, xeerarka Ciidammada iyo Xeerka Ciqaabta Guud.
2. Denbiyada ay sida badheedhka uga galaan ciidamadu dadweynaha waxaa awood u leh oo loo gudbinayaa Maxkamada Ciidamada Qaranka si waafaqsan Qodobka 104aad firqadiisa 1aad ee dastuurka JSL
3. Haddii uu taliyaha qaybtu u arko in aan falka xubintu gaadhsiisnayn in maxkamad lagu horgeeyo ama uu maxkamad u gudbinta ku waafaqi waydo taliyaha ciidanka, xubinta waxa lagu anshax marinayaa si waafaqsan xeerka anshaxa Ciidanka Booliska.
4. Xubnaha ciidanka booliska loo raaci maayo fal kasta oo ay ku galaan isticmaalka awoodda xeerarku jideeyay oo la xidhiidha Gudasho waajib is difaac, xaalad baahiyeed sharci u adeegsi hub si waafaqsan qodobada 33, 34, 35 & 36aad Xeerka Ciqaabta Guud.

## Qodobka 44aad

## Masuuliyad Madani

1. Xubnaha ciidanka booliiska looma raaci karo mas'uuliyad madani ah ama magdhaw ka dhashay fal ay ku galeen iyagoo sharciga ilaalinaya gudanayana waajibaadkooda ciidan si waafaqsan sharciga.
2. Dawlada ayaa masuul ka noqonaysa magdhawga madani ee ka yimaada:
   b. Falka xubinka ciidanka booliisku ku galo amar sarkaal awood u leh

   t. Falka xubinka ciidanku ku galo isaga oo shaqadiisa gudanaya si kama' ah ama taxadir darro ah.

   J. Magdhawga ama cawil celinta ka dhalata denbi ciqaab ah oo xubin ciidan ku gashay iyada oo shaqadeeda gudanaysa

   X. Fal kasta oo kale oo sharciga madanigu magdhawgeeda ku waajibinayo dawlada
3. Qof kasta oo weerar hub kala hor yimaadda ama xoog isku hortaaga ciidanka booliiska oo si sharciga waafaqsan u fulinaya amar ama hawlgal sharci ah, wuxuu masuul ka noqonayaa, khasaaraha naf ama maal ah ee soo gaadhay qofkaas, cid sadexaad ama ciidanka hawsha fulinaya si waafaqsan Qodobada 33, 34, 35 & 36aad Xeerka ciqaabta guud.
4. Xaaladaha lagu sheegay faqrada 3aad ee qodobkan waa in baadhis madaxbanaan lagu sameeyo, si loo xaqiijiyo cida masuuliyada qaadaysa.
5. Baadhista Madaxabanaan ee lagu sheegay faqrada 4aad ee qodobkan, waxaa samayn kara Guddida Dabagalka iyo cabashooyinka Dadweyanaha ee ku xusan Cutubka 8aad ee xeerkan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE

6. Ciidanka booliisku masuul kama noqon karo dhibta soo gaadhay qof si sharci ah loo hayay ama loo qabanayay falka ay xubinta booliiska ahi ku gaysato ka hortag baxsasho ama joojin baxsi, hadii uu adeegsanayo qofku hub lamid ah ka uu booliisku sito, marka xubinta booliisku si taxadir leh u dhaqantay.

## CUTUBKA 11AAD

## WADA SHAQAYNTA CIIDANKA IYO MAAMULADA GOBOLADA

### Qodobka 45aad

### Xidhiidhka Ciidanka Booliska iyo Maamullada Gobollada

1. Talisyada Qaybaha ciidanka booliiska ee Gobollada dalku waxay qabanayaan hawlaha la xidhiidha xoojinta nidaamka iyo sugidda nabadgelyada gobolka.
2. Ciidanka booliiska waxa Gobollada Wakiilo uga ah Taliyayaasha qaybaha, oo isku xidhaya dhammaan laamaha ciidanka booliiska ee heer Gobol, isla markaana xidhiidhinaya ciidanka booliiska iyo maamulka gobolka iyo hay'adaha iyo laamaha kale ee xukuumada heer gobol.
3. Taliyayaasha qaybaha Booliska ee Gobolada waxay arrimaha nabedgalyada kala shaqaynayaan Guddoomiyeyaasha Gobolada.
4. Haddii ay dhacdo xaalado nabadgelyo-darro oo saameeya laba degmo ama ka badan ee isla hal Gobol, waxa agaasinka hawsha booliiska ka mas'uul noqonaaya Taliyaha Qaybta booliiska ee Gobolkaas, isagoo ka amar qaadanaya Guddoomiyaha Gobolka, lana socodsiinaya Taliyaha Ciidanka Booliska.
5. Gudoomiyayaasha Goboladu waxay qaybaha ciidamada booliiska ee Goboladooda ka caawinayaan wax kasta oo suuragal ah oo ay hawshooda ku fulin karaan.
6. Haddii Degmooyinka hawsha nabadgelyada laga qabanayaa ku yaaliin laba Gobol ama wax ka badan waxa awoodda hawlgelinta ciidanka booliiska la wareegaya taliyaha ciidanka, isagoo la socodsiinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha.
7. Degmo kasta waxay lahaanaysaa saldhig ama saldhigyo booliis, ciidanka ka tirsan saldhigga booliiska ayaa maamulka degmada kala shaqaynaya xoojinta nidaamka iyo suggida ammaanka.
8. Ciidanka booliiska ee Degmo kasta waxay D/hoose kala shaqaynayaan cashuur ururinta iyo arrimaha kale ay maamulada Degmooyinku gacan siin ka dalbadaan ee sharciga waafaqsan.
9. Gudoomiyayaasha Golayaasha deegaanka ee Degmooyinku waxay saldhigyadda Booliiska ee Degmooyinka ka taageerayaan baahiyaha aasaasiga ah sida biyaha, laydhka iwm ee awoodooda dhaqaale ka baxsan.
10. Haddii ay dhacdo in dembiile ka baxsado degmada uu dembiga ku galay, una gudbo degmo kale, soo qabashadiisu waa waajib saaran saldhiga booliiska ugu dhow, sidoo kale booliiska Degmada uu dembiga ku galay waa raacdaysan karaan si loo soo qabto; waxase shardi ah inay la socodsiiyaan booliiska degmada ay ka hawlgelayaan.
11. Wada shaqaynta ciidanka booliiska iyo maamulada gobollada iyo degmooyinka ee ku xusan qodobada saree ee xeerkani, waxba uma dhimayso, wada shaqaynta iyo waajibaadyada dhinacyada ee lagu sheegay Xeerka Anshaxa Ilaalinta Nabadgalyada ee Xeer Lr 51, xeerka waddo-marista, xeerka socdaalka iyo xeerarka kale ee dalka.

## CUTUBKA 12AAD

## QODOBADA GABA-GABADA

### Qodobka 46aad

### Amarada & Tilmaamaha (Tallooyin) Joogtada ah.

Taliyaha ciidanka booliisku wuxuu awood u leeyahay markii waqti la joogaba inuu soo saaro

b) Awaamiir joogto ah oo la xidhiidha hagaag u socodsiinta arrimaha uu dhigayo Xeerka iyo xeer nidaamiyihu

t) fasaxyada, shaqo qoris, mushaharka, beddelka, shaqo ka saarid, tababarrada,

j) ogolaanshaha isticmaalka hubka iyo rasaasta

x) u dhamaystirka lebiska iyo qalabka xubnaha ciidanka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL'S OFFICE

kh) wadashaqaynta booliiska iyo hay'adaha kale ee dawlada

d) Wixii awaamiir ah ee sharciga waafaqsan ee fududaynaya hawlaha ciidanka ama kartida iyo anshaxa hagaagsan ee ciidanka ama arrimo kasta oo la xidhiidha arrimaha kor ku xusan.

## Qodobka 47aad
## Kormeerka dhaqangelinta & dhamaystirka Xeerkan

Kormeerka dhaqangelinta Xeerkan iyo dhamaystirka xeerarka, iyadoo la soo saarayo xeer-nidaamyada, hagayaasha, hab-raacyada iyo xafiisyada uu dhisayo, waxaa masuul ka ah Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## Qodboka 48aad
## Awoodda Maamul ee Xeerka

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudahu isagoo kala tashanaya Taliyaha ciidanka booliiska, wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye aan ka hor-imanayn Xeerkan oo uu xeerkan ku dhaqangelinayo kuna faahfaahinayo, ugu badnaan sanad gudihii oo ka bilaabanta maalinta Xeerku dhaqangalo.

## Qodobka 49aad
## Tirtirid

Waxaa la tirtiray ama la laalay xeer kasta oo xeerkan ka hor-imanaya.

## Qodobka 50aad
## Dhaqangalka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golayaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxwaynuhuna saxeexo.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

______________________________

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL**

______________________________